ARK TINDAL PRIMARY ACADEMY

Warbixino ku wajahan Waaliddiinta iyo Daryeelayaasha

Aragti

Waxaanu aaminsanahay waxa uu gaadhi karo ilme kasta oo dhigta ARK Tindal Primary Academy, waxaanuna u heelanahay in aanu samayno iskuul arday walba siiya bilawga ugu wanaagsan ee nolosha iyo firfircoonu uu waxbarashada ugu gaadho guul heer sare ah. Waxaanu higsanaynaa in aanu dhammaan caruurtayada u diyaarino Jaamacadda ama dariiqa shaqo ee ay doonayaan iyo in aanu ku dhalino inay sii wadaan waxbarashada.

Wacad

Dhammaan caruurta waxaa laga filayaa inay bartaan wacadka iskuulka. Waxaa laga doonayaa inay si jooto ah maalinta oo dhan u yidhaahdaan:

"Good, Better, Best, I will never rest."

("Wanaagsan, Ka wanaagsan, Ugu wanaagsan, Weligey nasan maayo")

Qiime - ASPIRE

Qiimaha iskuulkayagu waa wadnaha wax kasta oo aanu samayno:

Achievement (Ku guulaysi)

Scholarship (Deeq waxbarasho)

Perseverance (Ilaalin)

Integrity (Sumcad)

Responsibility (Masuuliyad)

Enthusiasm (Firfircooni)

Maalinta Isluulka

Sanadka bilawga ilaa Sannadka 6:

Albaabka iskuulka waxaa la furaa 8.35subaxnimo. Caruurta waxaa laga dalbaa inay ku sugaan garoonka ciyaaraha ilaa inta jeliska/gambaleelku ka dhawaaqayo, 8.55subaxnimo taas oo loogu tilmaamayo inay ku biiraan safafka fasaladooda. Macalinmiinta fasalada ayaa caruurta u kaxaysa xaga dhismaha iyagoo aamusan. Caruurta timaada xili ka dambeeya 8.55subanimo waxaa lagu qoraa habsan; talaabo dheeraad ah ayaa la qaadi doonaa haddii caruurtu si joogto ah iskuulka uga soo daahaan.

Marka ay maalinta iskuulku dhammaato, albaabada waxaa mar kale la furaa 3.25galabnimo. Waalidka/daryeelayaasha waxaa laga dalbaa inay ku sugaan garoonka ciyaaraha si caruurtu iskuulka uga tagaan 3.30 galabnimo. Macalimiinta fasalada waa in lala socodsiiyaa in waalid/ daryeelayaashu kaxaysteen caruurtoodii.

ARK TINDAL PRIMARY ACADEMY

Warbixino ku wajahan Waaliddiinta iyo Daryeelayaasha

Sanadka bilawga:

Xiisaddaha subaxii waxay socdaan laga bilaabo 8.55 subaxnimo ilaa 11.55duhurnimo

Xiisaddaha galabtii waxay socdaan laga bilaabo 12.35 duhurnimo ilaa until 3.30galabnimo

Waalidiinta iyo daryeelayaasha waxaa u furan inay wax weydiin kooban la yeeshaan macalimiinta fasalka ilmahooda xiliga iskuulka ka hor ama ka dib. Haddii kulan intaa ka dheer ama kulan gaar ah loo baahan yahay, waa inay ballan samaystaan. Haddii waaliddiin ama daryeelayaal u baahan yihiin inay la kulmaan xubin shaqaalaha ka mid ah oo aan ahayn macalinka fasalka ilmahooda, waxay u baahan doonaan inay ballan la samaystaan iyagoo u maraya xafiiska iskuulka.

Cuntada Iskuulka

Ilme kasta laga bilaabo Sannadka bilawga ilaa Sannadka 6 waxaa laga filayaa inay qadada iskuulka joogaan. Caruurtu waxay cuni karaan qado uu iskuulku bixiyo ama qado ayay soo qaadan karaan. Haddii waaliddiin ama daryeelayaal doonayaan inay sameeyaan qorshayaal gaar ah, waa inay kala xaajoodaan xubin sare oo shaqaalaha ka mid ah; tan waxaa keliya oo la aqbali doonaa haddii ay jirto xaalad khaas ah.

Kharashka hadda waa sida soo socota:

Caruurta dhigata Xanaanada ilaa Sannadka 6 £1.90 maalintiiba £9.50 isbuuciiba

Haddii waaliddiin ama daryeelayaal qaataan nooc ka mid ah gunooyinka-deeqeed, waxaa laga yaabaa in caruurtoodu xaq u yaalato cunto bilaash ah. Waaliddiinta iyo daryeelayaasha waxaa laga dalbayaa inay buuxiyaan foom dalbasho ayna keenaan xafiiska iskuulka iyadoo ay la socdaan cadaymo qaadasho gunooyin-deeqeed.

Abaalmarinno

Dhammaan caruurtu waxay habdhaqanka wanaagsan, imaatinka iyo soo daahid la'aanta ku heli doonaan abaalmarinno.. waxay sidoo kale abaalmarinno ku heli doonaan inay muujiyaan mid ka mid ah qiimayaash ASPIRE; abaalmannahaas waxaa loo bixin doonaa isbuuc walba, kulanka dabaaldegga ee iskuulka oo dhan, kaaso oo lagu martiqaado waaliddiinta iyo daryeelayaasha.

Dhammaan caruurta waxaa looga baahan yahay inay ku dhaqmaan sharciyada sikuulka iyo inay buuxiyaan waxyaalaha laga filayo ee habdhaqanka. Haddii aad samayso doorashooyin ah habdhaqan liita, waxaa la isticmaali doonaa ganaaxyo, waafaqsan xeerarka iskuulka, sida ku haboon.

Manhajka iyo Waxbarashada Guriga

ARK TINDAL PRIMARY ACADEMY

Warbixino ku wajahan Waaliddiinta iyo Daryeelayaasha

ARK Tindal Primary Academy ahaan waxaanu bixinaa manjah balaadhan oo miisaaman. Caruurta waxaa la siin doonaa khibraddo qani ah oo kala duwan, oo ay ka mid yihiin safarro iyo booqashooyin, kaas oo ku xidhiidhsan mawduuca waxbarashadooda. Waxbarashadu waxay ahaan doontaa mid shakhsiyaysan, oo loo marayo qiimayno joogto ah iyo gargaar shakhsiyaysan. Waxaa jira barnaamij muhiim ah oo Waxbarasho Guri, waalidiinta iyo daryeelayaashana waxaanu ka fialyaa inay sida ay awoodaan ee ugu wanaagsan caruurtooda uga caawiyaan inay dhammaystiraan hawlaha loo soo diro ee ay guriga ku soo samaynayaan oo ay iskuulka ku soo celiyaan xiligii la rabey in la soo celiyo. Waxbarashada Gurigu waxay ka koobnaan doontaa hawlo kala duwan, oo la xidhiidha waxbarashada fasalka, sida xarfaha, higaada qoraalka, wax qoridda, shaxda iskudhufashada iyo hawlaha kale ee xisaabta.